

Codsiga Ruqsada Furashada Xarunta Adeegga Cuntada ee Mudada Kooban

Tilmaamaha

Ku soo gudbi codsiga iyo khidmadaha ugu yaraan 15 maalmood kahor munaasabada koobaad.

U buuxi codsiga si cad oo dhamaystiran. Waa inaad saxeexdaa. Codsiyada aan si dhamaystiran loo buuxin waa la soo celin doonaa, midani waxay daahin doontaa hawlgalinta ruqsad bixinta.

U dir jeegaaga ama dalabkaaga lacag Vermont Department of Health. Markaad bixiso khidmada, dib uma heli kartid lacagtaas.

Dooroo Ruqsada Halka Munaasabad haddii aad qaban doonto keliya hal munaasabad oo soconaysa labo ilaa sadex maalmood oo xiriir ah. Dooroo Ruqsada Sanadka si aad u maamusho munaasabadaaha badan ama halka munaasabad oo soconaysa afar maalmood ama ka badan.

Meel kasta oo aad cunto ku diyaariso waa inay haysataa ruqsad aad ka heaysato Vermont Department of Health ama maamulka maxaliga ah. Haddii meesha aad ku diyaariso cuntada aysan ahayn Vermont, ku dar nuqulka ruqsada codsigan.

Boostada ugu dir codsiga iyo lacagta khidmada ah:

VT Dept of Health
 Environmental Health
 Food & Lodging Program
 280 State Drive
 Waterbury, VT 05671-8350

Talaabooyinka Xiga

Marka codsigaaga la eego lana ogolaado, ruqsadaada Xarunta Ku Meel gaarka ah ee Adeegga Cuntada ayaa laguugu soo diri doonaa iimeylka. Waad shaqeyn kartaa marka aad doonto kadib marka aad hesho ruqsadaada.

U diyaar garoow kormeer munaasabad kasta oo aad maamulayso.

Sharci ahaan, agabka codsiga lisaanka waa diiwaan dadweyne. Tani waxay ka micnaysan tahay inay heli karaan dadweynaha, haddii uusan si kale u mamnuucin sharciga Gobolka ama Dawlada dhexe.

Wixii su'aalo ah, ka wac Barnaamijka Cuntada iyo Hoyga 802-863-7221. Si aad u hesho adeegyada luuqada, wac 802-863-7220, kadibna taabo 0.

OFFICE USE ONLY		
License ID#		
Date Received		
License Fee Amount Received		
Check or Money Order Number		
License Issuance Approval	Initials	Date

Codsiga Ruqsada Furashada Xarunta Adeegga Cuntada ee Mudada Kooban

1. Dooro nooca ruqsada (dooro keliya hal):

- Ruqsada Sanadka - \$230.00**
 (shaqeynaaya 4 maalmood ama ka badan sanadkii)
- Ruqsada Halka Munaasabad - \$125.00**
 (shaqeynaaya 3 maalmood ama kayar sanadkii)

2. Xogta xarunta

Magaca Miiska Cuntada: _____

Magaca Shirkada ee Buuxa ee Sharciga ah:

LLC, Iskaashi, ama Hal Mulkiile: _____

Boostada

Ciwaanka: _____ Magaalada: _____ Gobolka: _____

Furaha Boostada: _____

Taleefanka: _____ Iimeylka: _____

Magaca (Magacyada) dadka Masuulka ka ah Munaasabada: _____

Taleefanka Gacanta: _____ Iimeylka: _____

Qofka masuulka ka ah ma yahay Maamulaha Badqabka Cuntada oo Shahaado Haysta? HAA
 MAYA

Hadday haa tahay, magaca barnaamijka shahaadada siiyay: _____ Taariikhda uu Dhacaayo: _____

3. Munaasabada

Qor dhammaan munaasabadaha aad uga qaybgeli doonto Vermont. Adeegso warqad dheeri ah haddii loo baahdo.

Munaasabada Koobaad:

Goobta:

Taariikhda:

--	--	--

Dhammaan Munaasabadaha Kale: Goobta:

Taariikhaha:

--	--	--

4. Dib u Eegista Dookhyada Cuntada iyo Habraaca

Qeex dhammaan dookhyada cuntada ee la iibinaayo. Adeegso warqad dheeri ah haddii loo baahdo. Haddii cuntada lagu diyaariyo meel ka baxsan gobalka, soo dir nuqulka ruqsada.

Noocyada cuntada la iibinaayo, tijaabada ama diyaarsan	Hanaanka Diyaarinta: Ku dar dhammaan talaabooyinka cunto karinta, qaboojinta, kulayl iyo qabow ku haynta.	Goobta Diyaarinta Qeex goobo kasta oo banaanka ah.

5. Shuruudaha Ruqsada

Soo koobitaanka shuruudaha ruqsada xarunta adeegga cuntada ee mudada kooban ayaa hoos ku qoran. Waa inaad fulisaa dhammaan shuruudahan Aadna raacdaa dhammaan Sharciga Xarumaha Adeegga Cuntada ee Waaxda Vermont Health. Waa inaad saxdaa god kasta si aad u muujiso inaad fahmayso Aadna ku dhaqmayso shardi kasta.

Shardiga	✓
Dhammaan cuntada, cabitaanka iyo barafka waa inay ka yimaadaan meel aqoonsi leh.	
Dhammaan cuntada waa in si sax ah loo calaamadiyaa loona kaydiyaa si looga hortago sumoobida.	
Dhammaan cuntooyinka khatarta ah waa in lagu kariyaa heerkulka saxda ah kadibna la kaydiyaa, lagu soo bandhigaa laguna bixiyaa heerkulka 135° F ama ka hooseysa 41° F.	
Waa mamnuuc in gacmo qaawan lagu taabto cuntada bisil. Maacuunta saxda ah ama galloofis waa in la bixiyaa.	
Shaqaaluhu waa inay farxashaan, ayna ku farxashaan biyo kulul oo ah 100° F iyo saabuun ayagoo isku xoqaaya gacmaha ugu yaraan 20 sikan sida qasabka ah.	

Barafka waa in lagu kaydiyaa qasac si sax ah looga saaray biyaha loogana difaacay sumoobida.	
Waa inaad bixisaa qalab ilaalinaaya heerkulka dhammaan cuntooyinka khatarta ah kuna haynaaya heerkulka la rabo inta la kaydinaayo, la diyaarinaayo, lasoo bandhigaayo lana bixinaayo.	
Dhammaan cuntooyinka khatarta ah waa in la gashaa talaagad ama sida qaybta ka ah hawsha cunto karinta.	
Adeegso farsamooyinka wanaagsan ee nadaafada.	
Waa inaad u diidaa shaqaalaha jiran inay maamulaan cuntada ayna diyaariyaan.	
Xirayaasha saxda ah ee timaha iyo dharka kore ee nadiifta ah ama yunifoomta waa in la xidhaa.	
Waa inaad bixisaa meelaha la ansixiyay si loogu dhaqo, loogu biyo raaciyo oo loogu nadiifiyo qalabka iyo maacuunta.	
Waa inaad bixisaa heerkul cabireyaasha saxda ah iyo kiishka hubinta nadiifiyaha.	
Waa inaad kaydisaa una qaybisaa agabka halka adeeg si sax ah.	
Meesha weelasha lagu dhaqo ee gacanta lagu dhaqo waa inay leedahay biyo raacin sax ah.	
Waa in istiraashooyinka wax tirtira waa in si sax ah loo adeegsadaa looguna kaydiyo nadiifiyaha kiimikada.	
Dusha meelaha cuntadu taabato iyo maacuunta ayaa loo nadiifiyaa si sax ah.	
Si sax ah u xaree qalabka nadiifta ah iyo maacuunta.	
Biyuhu waa inay ka yimaadaan il la ogol yahay.	
Biyaha qashinka iyo bulaacada waa in si sax ah loo fogeeyaa.	
Nidaamka tuubooyinka waa in la rakibaa si looga hortago noloshada biyaha iyo daad raaca wasaqda.	
Goobaha farxalka waa in laga sameeyaa meelo sahlan ayna leeyihii biyo leh heerkulka 100° F.	
Waa inaad ka hortagtaa cayayaanka, jiirka iyo bakteeriyada si aysan u gelin aaga.	
Waa inay leedahay nal ku filan, dhammaan meelahaha waa in lagu xiraa guluubyo aan jabayn.	
Dhammaan agabka sunta ah waa in la calaamadiyaa loona kaydiyaa si sax ah.	
Dhammaan aagaga waa inaanay lahayn qashin, wasaq ama xaabo.	

6. Qaabka Xarunta Cuntada

Si kooban u qeex goobtaada farxalka iyo sida aad u buuxinayso shuruudaha farxalka. Sinkiyyada adag waa inay leeyihiin saabuun, biyo kulul (100F), tiishka gacmaha iyo qasabad shaqeynaysa.

Si kooban u qeex sida aad u buuxinayso shuruudaha weel dhaqista. Shuruudaha weel ku dhaqista gacmaha ayaa sheegaaya inay qasab tahay inaad haysato saxanada dhaqista, biyo raacinta, iyo jeermis dilista (kuwaan ayaa noqon kara baafaf caag ah), biyaha diiran, saabuun iyo jeermis dile (badanaa warankiilo) oo u diyaarsan in la isticmaalo.

7. Bayaanka Codsadaha ee Ku Saabsan Taageerada Ilmaha iyo Canshuuraha

Sida waafaqsan sharciga Vermont, waxaa lagaa rabaa inaad cadayso inay tahay mid "xaalad wanaagsan" ka taagan bixinta masruufka ilmaha kahor inta aanad helin ruqsada xirfada ama shahaado ganacsi ama ganacsi kale. (Waxaad akhrin kartaa sharciga adiga oo interneetka ka raadinaya 15 V.S.A. § 795.)

Saxeexaaga codsigan wuxuu muujinayaa inaad tahay mid "xaalad wanaagsan" ka taagan masruufka ilmaha sababtoo ah mid ka mid ah kuwan ayaa khuseeya:

- Lagaagama baahna inaad bixiso masruufka ilmaha.
- Waxa lagugu leeyahay wax ka yar hal bil oo taageero ah.
- Waxaad hadda maxkamada kula doodaysaa taageerada ilmaha ee lagugu leeyahay.
- Waxaa lagugu leeyahay taageerada ilmaha laakiin waxaad raacaysaa qorshaha lacag bixinta.
- Tani ma khusayso sababtoo ah waa ganacsi raadinaya ruqsada shahaado.

Sida waafaqsan sharciga Vermont, waxaa lagaa rabaa inaad cadayso inaad tahay mid "xaalad wanaagsan" ka jooga cashuuraha lagugu leeyahay Gobolka Vermont ka hor inta aanad helin ruqsada xirfada ama shahaado ganacsi ama ganacsi kale. (Waxaad akhrin kartaa sharciga adiga oo interneetka ka raadinaya 32 V.S.A. § 3113.)

Saxeexaaga codsigan wuxuu muujinayaa inaad tahay mid "xaalad wanaagsan" ka taagan canshuurta Vermont sababtoo ah mid ka mid ah kuwan ayaa khuseeya:

- Waxaad xereysay dhammaan canshuur celintaada wax canshuur ahna laguguma laha.
- Waxaad hadda rafcaan ka qaadanaysaa qadarka cashuuraha lagugu leeyahay.
- Waxaa lagugu leeyahay canshuur laakiin waxaad u hogaansameysaa qorshaha lacag bixinta ee Guddoomiyaha Canshuuraha.

Haddii aadan dhaqaale ahaan isku filnayn, waxaad ka codsan kartaa maamulka ruqsad bixinta inay ka fiirsadaan haddii lagaaga baahan yahay inaad kasoo baxdo waajibka masruufka carruurta ama canshuurta Vermont kahor inta aysan bixin ruqsada ay noqon doonto dhibaato aan macquul ahayn.

Waxaan halkan ku cadeynayaa in aan isku filnahay marka la eego taageerada carruurta iyo canshuurta Vermont. Waxaan kaloo cadaynayaa in dhammaan maclummaadka lagu sheegay codsigan ay yihiin kuwo run ah oo sax ah inta aan ogahay. Waxaan fahamsanahay in bixinta maclummaad been ah ama ka tagitaanka maclummaadka ay tahay mid sharciga ka soo horjeeda oo ay sababi karto in aan waayo ruqsada/shahaadada/diiwaangelinta.

Lambarka Aqoonsiga Canshuurta AMA Lambarka Sooshal Sekiyuuratiga: _____

Magaca Farta Wayn ku qoran: _____ Darajada: _____

Saxeexa Codsadaha: _____ Taariikhda: _____